Washington Apple Health

Haggaha Kuhagga Washington Apple Health Dadka Biloowga-ah (Medicaid)

Qaybta 1 ee haggahaan waxay kaa dhigaysaa in aad biloowdid. Waxay kajawaabeysaa qaar kamid ah su'aalaha aasaasiga ah.
Qaybta 2 waxay kusiinaysaa tallo kusaabsan booqashadaada ugu horeysa ee aad kubooqatid daryeel bixiyaha.

Qaybta 1: Kadib marka aad isku qortid Apple Health

Waxaan boosto kuugu soo diri doonaa buugg yare, lagu magacaabo *Kusoo dhowoow Washington Apple Health*, waxaana kuqoran macluumaad muhiim ah oo kusaabsan ceymis kujiridaada. Sidoo kale waxaad kaheli kartaa gudaha boggeena internetka oo ah cinwaankaan **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf**.

Sidoo kale, qorshahaaga caafimaadka wuxuu kuusoo diri doonaa macluumaad.

Midkaan waa Kaarkaaga Adeegaha

Kudhowaadkii labbo usbuuc kadib marka aad isku qortid Washington Apple Health, waxaad heli doontaa Kaarka Adeega (sidoo kale lagu magacaabo kaarka ProviderOne) mid lamid ah kan halkan kusawiran. Hayso kaarkaan. Kaarkaaga Adeega wuxuu tusinayaa lambarkaaga aad macmiilka kutahay, midkaas oo aad u baahantahay si aad u qaadatid adeegaha caafimaadka. Adiga uma baahnid in aad shaqaysiisid Kaarkaaga Adeegaha cusub. Waa mid shaqaynaya kahor inta aan boosto laguugu soo dirin.

Xubin kasta oo kamid ah qoyskaaga xubinkaas oo u qalma adeegaha Apple Health wuxuu qaadanayaa Kaarkiisa Adeegaha goonida ah. Qof kasta wuxuu leeyahay lambar macmiil gooni ah midkaas oo uu haysanayo intuu noolyahay oo dhan.

Haddii aad hore u haysatay ceymis kujirid Apple Health ah (ama hore u haysatay Caawimaad caafimaad loo yiqiiney sida Apple Health), kuuma

soo direyno kaar cusub. Kaarkaaga hore weli waa mid shaqaynaya, xitaa haddii aanan laguu ceymis gelin si joogto ah. Lambarkaaga macmiilka wuxuu ahaanayaa sidiisa.

Waxaad ku arki doontaa "ProviderOne" oo kuqorantahay Kaarkaaga Adeegaha

ProviderOne waa nidaamka kombuyuutarka isku habeeya qorshooyinka caafimaadka. Sidoo kale waxay kuusoo direysaa warqado iyo buuggaag yar-yar oo kuwa gacanta ah. Lambarka kuqoran dusha kaarka waa lambarka macmiilka ProviderOne-kaaga.

Washington State Health Care Authority

Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa maamula Washington Apple Health (Medicaid).

HCA 19-024 SM (7/16) Somali

Ilaalinta khusuusiyadaada

Kaarkaaga Adeegaha kuma qorna wax macluumaad shakhsi ah aan ka ahayn magacaaga, lambarka macmiilka ProviderOne-kaaga, iyo taariikhda lasoo saarey. Khusuusiyadaada waa la ilaalinayaa haddii uu kaarka lumo ama laxado.

Midna Apple Health ama qorshaha caafimaadka kuulama soo xiriiri doonto si toos ah si ay kuuweydiiso macluumaadaada shakhsiyeed si aad u heshid ama u bedeshid Kaarka Adeegaha. Weligaaga ha siinin macluumaadaada shakhsiyeed, sida lambarkaaga Dammaanada Bulshada, qof kuusoo wacey ama boosto kuusoo direy si uu kuu weydiiyo. Haddii uu qof kuweydiiyo lambarkaaga Dammaanada Bulshada, fadlan weydii magacooda iyo macluumaadooda xiriirka, kadibna usoo sheeg Xarunteena Adeega Macmiilka adiga oo soo waca lambarkaan 1-800-562-3022.

Haddii aadan helin kaarka

Haddii aadan helin Kaarkaaga Adeegaha dhammaadka labbo todobaad oo laga joogo kadib marka aad dhammeysid codsigaaga Apple Health, fadlan halkan ka booqo bogga internetka macmiilka ProviderOne **https://www.waproviderone.org/client** si aad u heshid kaar lacag la'aan bedelaad ah.

Isku qorida qorshahaaga caafimaadka

Haddii aad uga codsatid sitoos ah halkan Apple Health **www.wahealthplanfinder.org**, waxaa laga yaabaa in laguugu qoro mid kamid ah qorshooyinka caafimaadka laga helo goobtaada. Haddii aadan isku qorin qorshaha caafimaadka waqtigaas, anaga ayaa mid kuu dooran doona.

Haddii laga helayo qorshe kale goobta aad degantahay, waxaad u bedeli kartaa waqti kasta oo aad doonto adiga oo soo booqda boggaan internetka **www.wahealthplanfinder.org**. Bedelaada lagu sameeyo qorshahaaga caafimaadka waa mid hirgala maalinta koowaad ee bisha ku xigta.
(Fiiri "Ma bedeli karaa qorshahayga caafimaadka?" ee kuqoran bogga 4aad si aad u oggaato waxyaabo kusaabsan qaabab kale oo lagu bedeli karo qorshahaaga.)

Dib u cusboonaysiinta ceymis kujiridaada

Kuqornaantaada aad kuqorantahay Apple Health badanaa waxay sii jireysaa illaa iyo hal sanno. Waxaan kuusoo diri doonaa warqad si aynu kuu soo xusuusino in aad cusboonaysiiso ceymis kujiridaada Apple Health, sidaas darteeda waa muhiim in aad cusboonaysiisid cinwaankaaga wax laguugu soo diro haddii aad bedeshid. Warqada waxaa laga yaabaa in ay kuqorantahay in ceymis kujiridaada loo cusboonaysiin doono si toos ah, iyo in aadan ku khasbanayn in aad waxna sameysid aan ka ahayn haddii macluumaada kuqoran warqada aanan sax ahayn. Haddii aad u baahantahay in aad dib u cusboonaysiisid Apple Health-kaaga, waxaad ka cusboonaysiin kartaa boggaan internetka **www.wahealthplanfinder.org**, tooska boosto, ama tooska adiga oo teleefoon soo dira. Warqada waxay kuugu sheegi doontaa dhammaan doorashooyinkaaga si faah-faahsan.

Halkan waxaa kuqoran shan qorshe ee caafimaadka iyo macluumaadooda xiriirka. Ma ahan dhammaan qorshooyinka kuwo laga helo goobaha gobolka oo dhan.

Qorshaha caafimaadka la maamuley	Teleefoonka aasaasiga ah	Khadka caawimaada Kalkaalisada
Amerigroup Washington, Inc. (AMG) **www.myamerigroup.com/wa/pages/welcome.aspx**	1-800-600-4441	1-800-600-4441
Qorshaha Caafimaadka Bulshada ee Washington (CHPW) **www.chpw.org**	1-800-440-1561	1-866-418-1002
Shirkada Isku xirka Daryeelka (CCC) **www.coordinatedcarehealth.com**	1-877-644-4613	1-877-644-4613
Daryeelka caa imaadka Molina ee Washington (MHC) **www.molinahealthcare.com/members /wa/en-us/Pages/home.aspx**	1-800-869-7165	1-888-275-8750 Isbanish 1-866-648-3537
Qorshaha Bulshada Daryeelka caafimaadka Midoobey (UHC) **www.uhccommunityplan.com**	1-877-542-8997	1-877-543-3409





Kaarkaaga qorshaha caafimaadka

Qorshahaaga caafimaadka wuxuu kuu soo diri doonaa Aqoonsiga kaarka u eg sida mid kamid ah kuwaan kor ka muuqda. Hayso kaarkaan. Hore usoo qaado dhammaan Kaarka Adeegahaaga iyo kaarka qorshahaaga caafimaadka marka aad aadaysid dhakhtar, farmashiye, ama meel kale oo daryeel caafimaad bixiye ah. Sidoo kale waxaad u baahnaan kartaa sawir Aqoonsi.

Su'aalooyin laga yaabo in aad qabtid

Sideen ku heli karaa lambarkayga macmiilka haddii aanan weli haysan kaarkayga?

Haddii aad u baahantahay in aad aragtid dhakhtar ama buuxisid qoraal daawo kahor inta aynaan kaararkaagu imaanin, waxaad haysataa labbo qaab si aad u heshid adeegahaaga:

- Kabooqo halkan bogga internetka macmiilka **https://www.waproviderone.org/client** si aad u heshid lambarkaaga macmiilka. Sii lambarkaas caafimaad bixiyaha ama farmashiilaha.
- U sheeg caafimaad bixiyaha ama farmashiilaha magacaaga, taariikhda dhallashadaada, iyo lambarka Dammaanada Bulshada. Waxay kaa fiirin karaan internetka waxayna markaasi heli karaan lambarkaaga macmiilka.

Maxaan sameynayaa haddii Aan lumiyo Kaarkayga Adeegaha?

Waxaa jira qaabab baddan oo loogu codsan karo kaar bedelaad ah oo lagu siiyo booskii midka kaa lumey:

- Ka gal halkan bogga internetka macmiilka **https://www.waproviderone.org/client**.
- Ka wac Xarunta Adeega Macmiilka lambarkaan 1-800-562-3022.
- Si toos ah uga codso bedelaad boggaan internetka **https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/client_webform**. Dooro mowduuca "Kaarka Adeegaha."

Majiraan wax lacag ah oo aad ku bixineyso kaarka cusub. Waxay qaadanaysaa todobo illaa 10 maalmood si aad ugu heshid kaarka cusub tooska boostada. Kaarkaagii horena waxaa laga joojin doonaa in uu shaqeeyo kadib marka aad codsatid mid cusub.

Maxaan sameynayaa haddii Aan lumiyo kaarkayga qorshaha caafimaadka?

Wac qorshahaaga caafimaadka kana codso kaar cusub. (Kafiiri macluumaada xiriirka wixii kusaabsan qorshooyinka caafimaadka, bogga 2aad.)

Sideen u baari karaa ama u hubsan karaa si aan u arko haddii aan kujiro ceymis kujirida Apple Health ama in la igu qorey qorshaha caafimaadka?

Waxaad ka hubsan kartaa ama kabaari kartaa si aad u aragtid haddii ay bilaabatay ceymis kujiridaada iyo haddii kale adiga oo halkan kabooqda bogga internetka macmiilka ProviderOne **https://www.waproviderone.org/client** ama kawac Xarunteena Adeega Macmiilka lambarkaan 1-800-562-3022. Waxaad u baahnaan doontaa in aad oggaatid lambarka Kaarka Adeegahaaga ama lambarka Dammaanada Bulshada.

1. Dusha sare ee liiska aasaasiga ah, kadooro luuqada kadibna raac su'aalaha teleefoonka. Jawaabta su'aasha koowaad waa "Adeegaha macmiilka."
2. Jawaabta su'aasha kuxigta waa "Baar u qalmida."
3. Kadib, marka su'aal lagu weydiiyo, dheh "Sii soco."
4. Su'aasha xigta, uga jawaab mid kamid ah "Kaarka Adeegaha DSHS" (midaana macnaheedu waxay tahay Kaarkaaga Adeegaha) ama "kaarka Dammaanada Bulshada," ayada oo ay tahay mid kuxiran lambarka aad garanaysid. Waxaad dhihi kartaa lambarka ama garaac.

(Sii socota)

5. Su'aasha waxay kuweydiin doontaa CALAAMADA Boostada.
6. Kadib, su'aasha lagu weydiin doono waxay noqon kartaa haddii aad doonaysid macluumaad kusaabsan nafsadaada ama macluumaad kusaabsan xubin kale oo qoyska katirsan.
7. Ugu dambeysta, marka su'aal lagu weydiiyo, waxaad dhahdaa haddii aad u baahantahay in aad baartid xaalada isqorida maanta ama taariikh kale. Adeega duuban wuxuu kuu sheegayaa xaaladaada isqorida (haddii aad isqortey) iyo nooca qorshaha caafimaadka aad isku qortey taariikhdaas.

Miyaan ku khasbanahay in aan isku qoro qorshaha caafimaadka?

Haa, ayada oo ay jiraan xoogaa kareebid ah. Wixii kusaabsan macluumaad faah-faahsan kafiiri buugg yaraha *Kusoo dhowoow Washington Apple Health* boggaan internetka **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf**.

Miyaan la kulmi karaa daryeel bixiye kasta oo Aan rabbo?

Maya, keliya waa in aad la kulantaa daryeel bixiyayaasha kujira shabakada qorshahaaga caafimaadka, aan ka ahayn haddii qorshaha caafimaadka uu kusiiyo oggolaansho qoran oo aad ku arki karto takhasusleh, ha ahaado mid kujira gudaha shabakada qorshaha caafimaadka ama ha ahaado mid aan kujirin oo banaanka ka ah.

Haddii aad u baahantahay in aad u tagto dhakhtar gaar ah ama daryeel caafimaad bixiye gaar ah, weydii dhakhtarka ama daryeel bixiyaha nooca qorshaha caafimaadka uu asaga ama ayada kujiro. Haddii dhakhtarkaas ama daryeel bixiyahaas uu yahay qof kujira qorshaha caafimaadka laga helo goobta aad degantahay, waxaad bedeli kartaa qorshooyinka caafimaadka. Qaar adeegaha kamid ahi ma ahan kuwo lagu ceymis geliyay dhinaca qorshahaaga caafimaadka, laakiin waxaa lagu ceymis geliyay hoosta adeega-lacag-la'aanta ah ee Apple Health, adigana waxaad u bahnaan doontaa in aad la kulanto daryeel bixiye oggolaanaya adeega-lacag-la'aanta ah ee Apple Health. (Fiiri "Waxa uu yahay adeega-lacag-la'aanta ah?" ee kuqoran bogga 5.)

Muxuu yahay daryeel bixiyaha aasaasiga ah?

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ahi waa dhakhtarka, kalkaaliso khibrad leh, kuwo kale oo xirfadlayaal daryeel caafimaad ah, ama xarunta caafimaadka aad u aadid inta baddan ama dhammaan daryeelkaaga caafimaadka. Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ahi waxaa khasab ah in uu kujiro gudaha shabakada qorshahaaga caafimaadka.

Sideen ku heli karaa daryeel bixiyaha aasaasiga ahi?

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ahi waxaa khasab ah in uu kujiro gudaha shabakada qorshahaaga caafimaadka. Kadooro daryeel bixiye aasaasi ah shabakada qorshahaaga caafimaadka hadda ah, haddii kale qorshaha ayaa kugu caawin doona in uu mid adiga kuu doorto. Booqo bogga internetka qorshahaaga caafimaadka si aad u dooratid daryeel bixiyaha aasaasiga ah. Waxaad kaheli doontaa Qaybta 2 ee kamid ah haggahaan wax baddan oo kusaabsan doorashada daryeel bixiyaha.

Sideen u sameysan karaa ballan?

Qorshahaaga daryeelka caafimaadka ayaa kuu soo diri doona macluumaad kusaabsan sida loo sameysto ballanta. Ama, wac qorshahaaga caafimaadka ayaga ayaana kuu sheegi doona sida loo sameeyo. Sidoo kale fiiri Qaybta 2 ee kamid ah haggahaan wixii kusaabsan macluumaada khuseysa sameynta ballantaada ugu horeysa.

Miyuu u baahanyahay qofkasta oo kamid ah qoyskayga in uu haysto isla qorshahaan caafimaadka?

Haa. Guud ahaan, qofkasta oo kamid ah qoyskaaga waxay haystaan isla qorshahaan caafimaadka, aan ka ahayn haddii ay yihiin kuwo u dhashay Hindida Mareykanka ah ama kuwo U dhashay Alaska. Buugg yaraha *Kusoo dhowoow Washington Apple Health* **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf** waxaa kuqoran macluumaad dheeri ah.

Muxuu yahay farqiga u dhaxeeya qorshooyinka?

Dhammaan qorshooyinka waxay ceymis geliyaan adeegaha aasaasiga ah, laakiin waxay leeyihiin xoogaa kala duwanaansho ah oo kusaabsan qaabka ay u bixiyaan adeegaha. Buugg yaraha *Kusoo dhowoow Washington Apple Health* **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf** waxaa kuqoran adeegaha aasaasiga ah.

Qorshe caafimaad kasta wuxuu leeyahay shabakadiisa daryeel bixiyayaal. Fadlan kaxaqiijiso qorshaha caafimaadka haddii daryeel bixiyayaasha aad jeceshahay ay yihiin kuwo kujira shabakada qorshaha.

Miyaan bedeli karaa qorshahayga caafimaadka?

Haa, waqti kasta. Bedelaada waxay dhaqan galaysaa maalinta koowaad ee bisha xigta kadib marka aad bedesho. Waxaa jira qaabab baddan oo lagu bedeli karo qorshahaaga:

- Ka bedel bogga internetka Washington Healthplanfinder. **www.wahealthplanfinder.org**

(Sii socota)

- Ka booqo bogga internetka Macmiilka ProviderOne halkan. **https://www.waproviderone.org/client**
- Si toos ah uga codso bedelaad boggaan internetka **https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/client_webform/** . Dooro mowduuca "Isqor/Bedel Qorshooyinka Caafimaadka."
- Kadaabaco foomka isqorida boggaan internetka **www.hca.wa.gov/ assets/free-or-low-cost/13-862.pdf**. U buuxi kadibna boosto ugu dir sida waafaqsan tilmaamaha kuqoran, ama faakis ahaan ugu dir lambarkaan 1-866-668-1214.
- Kawac Xarunteena Adeega Macmiilka lambarkaan 1-800-562-3022.

Farmashiyahee ama dukaan kee daawo lagu gado ee aan isticmaali karaa?

Qorshahaaga caafimaadka ayaa kusiin doono macluumaad kusaabsan nooca ay yihiin farmashiyaasha ama dukaanada daawada aad isticmaalaysid.

Maxaan sameynaa haddii aan u baahdo daryeel saacado kadib?

Qorshahaaga caafimaadka wuxuu leeyahay lambar teleefoon lacag la'aan ah waad wici kartaa si aad ula hadashid kalkaalise shaqaysa 24 saac maalintii, todobo maalin isbuucii. Lambarka teleefoonka wuxuu kuqoranyahay gudaha macluumaada uu kuusoo diro qorshahaaga caafimaadka wuxuuna kuqoranyahay bogga 2.

Maxaan sameynaa haddii aan qabbo xaalad degdeg ah?

Haddii aad qabtid xaalad kedis ah ama mushkilad caafimaad xaaladeedu darantahay middaas oo aad u maleyso in aad u baahantahay xaalad degdeg ah, wac 911 ama aad meesha kuugu dhow halkaas oo ay kugu caawin karaan daryeel bixiyayaasha xaaladaha degdega ah. Markaas kadib sida ugu dhakhsiyaha baddan, u wac qorshahaaga caafimaadka una sheeg in ay kugu dhacday xaalad degdeg ah iyo meesha aad kaheshay daryeelka.

Haddii aad u baahantahay daryeel degdeg ah, laakiin noloshaada aanan ahayn mid markaasi khatar kusugan, wac daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah, qorshahaaga caafimaadka, ama khadka kalkaalisada shaqaysa 24-saac. Kafiiri bogga 2 wixii kusaabsan lambarada teleefoonka.

Miyaan ku khasbanahay in aan la kulmo ama arko daryeel bixiyaha ama aan buuxiyo qoraalo daawo?

Maya—intiiba aad raacaysid xeerarka uu kuu dejiyay qorshahaaga caafimaadka.

Waxaa dhici karta in aad lacag bixisid haddii:

- Aad heshid adeeg aan laceymis gelin, sida daryeelka daaweynta laf dhabarta ama qaliin isqurxin ah.
- Aad heshid adeeg aan caafimaad ahaan daruuri u ahayn.
- Aadan garanayn magaca qorshahaaga caafimaadka, haddana adeeg bixiyaha aad u tagtay uusan garanayn qofka lasiinayo biilka. Waana middaan sababta khasab kadhigta in aad hore u qaadatid Kaarkaaga Adeegaha iyo kaarkaaga qorshaha caafimaadka markasta oo aad adeegaha u baahatid. (Kafiiri macluumaada kusaabsan kaararkaan boggaga 1-3).
- Aad kaheshay daryeel adeeg bixiye aan kujirin shabakada qorshahaaga caafimaadka, aan ka ahayn haddii ay xaaladu tahay mid degdeg ah ama uu yahay qof hore-looga oggolaaday dhinaca qorshahaaga caafimaadka.
- Aadan raacin xeerarka qorshahaaga caafimaadka ee kusaabsan ka helida daryeelka aad kaheshid takhasusle.

Muxuu yahay adeega-lacag-la'aanta ah?

Middaasi waa midda aynu ugu yeerno marka ay Apple Health ugu bixiso si toos ah dhakhtarada iyo daryeel bixiyayaasha adeeg kasta oo ay qabtaan. Inbaddan oo kamid ah macamiisha Apple Health uma qaataan adeega-lacag-la'aanta ahi daryeelkooda caafimaad ee caadiga ah. Inbaddan oo macamiisha kamid ahi waxay qaataan "daryeelka lamaareeyay" guud ahaan qorshooyinkooda caafimaadka inbaddan oo adeegahooda kamid ah. (Fiiri su'aasha xigta, "Muxuu yahay daryeelka lamaareeyay?")

Dheefaha gaarka ah ee adiga lagu siiyo ayaa lagu magacaabaa "dheefaha adeega-lacag-la'aanta ah." Dheefahaan waxaa laga ceymis geliyay dhinaca gobolka, mana ahan kuwo laga ceymis geliyay tooska qorshahaaga caafimaadka, waxaana laga bixiyaa dhinaca barnaamijyo iyo adeego kusalaysan-bulshada kale. Kafiiri Helida ProviderOne qalabka raadiska Daryeel bixiyaha boggaan internetka **https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider** si aad u heshid daryeel bixiye adeeg-lacag-la'aan ah.

Dheefaha adeega-lacag-la'aanta ah waxaa kamid ah daryeelka ilkaha, khamro iyo isticmaalka adeegaha maandooriyaha, daryeelka muddada-dheer, iyo daryeelka bukaan-jiifka cudurka maskaxda. Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ama qorshaha caafimaadka wuxuu kugu caawin doonaa in aad heshid dheefahaan iyo in uu isku duwo daryeelkaaga.

Si aad u aragtid liis kusaabsan dheefaha adeega-lacag-la'aanta ah, fiiri buugg yaraha *Kusoo dhowoow Washington Apple Health* **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf**.

Muxuu yahay daryeelka lamaareeyay?

Inbaddan oo kamid ah macamiisha Apple Health waxay haystaan "daryeelka lamaareeyay," middaas oo macnaheedu tahay in Apple Health ay bixiso qorshe

caafimaad oo ah lacag bile ah oo loogu talogalay daryeelkaaga. Qorshaha caafimaadka kadib wuxuu lacag siiyaa daryeel bixiyaha adiga daryeelka kusiiya. Inbaddan oo kamid ah macamiisha Apple Health waxay u qaataan daryeelka lamaareeyay inbaddan oo adeegahooda kamid ah, laakiin qaar kamid ah adeegaha waxaa laga bixiyaa tooska "adeega-lacag-la'aanta ah." (Fiiri su'aasha lasoo dhaafay, "Muxuu yahay adeega-lacag-la'aanta ah?")

Sideen kuhelaa daryeelka ilkaha?

Waxaad kaheshaa daryeelka ilkaha daryeel bixiye aqbala adeega-lacag-la'aanta Apple Health. Kafiiri Helida ProviderOne qalabka raadiska Daryeel bixiyaha boggaan internetka **https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider** si aad u heshid daryeel bixiye adeeg-lacag-la'aan ah.

Maxay yihiin adeegaha ilkaha iyo daaweynta la ceymis geliyay?

Kafiiri dulmarka adeegaha ilkaha loogu talogalay dadka waaweyn ee da'doodu tahay 21 sanno ama kaweyn kuwaas oo laga ceymis geliyay dhinaca Apple Health boggaan internetka **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-811.pdf.**

Sideen kuheli karaa baaritaano isha iyo ookiyaalaha isha ah?

Baaritaanada isha, ay kujirto baaritaano loogu talogalay jabnaan iyo qaybaha araga, waxaa laga bixiyay tooska qorshahaaga caafimaadka.

- Loogu talogalay caruurta gaaray 20 sanno jir — dhinacyada ama looxda ookiyaalaha, muraayadaha, muraayadaha araga, iyo adeegaha rakibaada waxaa laga ceymis geliyay dhinaca adeega-lacag-la'aanta ah Apple Health.
- Loogu talogalay dadka waaweyn — dhinacyada ama looxda ookiyaalaha, muraayadaha, iyo muraayadaha araga ma **ahan kuwo lagu ceymis geliyay** dhinaca Apple Health, laakiin haddii aad jeceshahay in aad iibsatid qalabkaas, waxaad ka codsan kartaa tooska daryeel bixiyayaasha kaqayb qaadanaya ayaga oo ah qiimo jaban. Waxaad kaheli doontaa liis kusaabsan daryeel bixiyayaasha kaqayb galaya boggaan internetka **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf**.

Muxuu yahay farqiga u dhaxeeya Washington Apple Health iyo Caawimaada caafimaadka?

Washington Apple Health waa magac loogu talogalay Caawimaada caafimaadka kajirta gudaha Gobolka Washington. Daryeel bixiyahaaga ama shaqaalaha soo dhoweynta waxaa dhici karta in uu ugu yeero Caawimaada caafimaadka. Waxayna ula jeedaa isku shay.

Maxaa kale oo aan u baahanahay in aan oggaado?

Macluumaad dheeri ah waxay kujirtaa gudaha buugg yaraha *Kusoo dhowoow Washington Apple Health* ee laga helo boggaan internetka **www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf** iyo qalabka aad kahesho dhinaca qorshahaaga caafimaadka.

Boggag Internetka Muhiim Ah iyo CINWAANADA BOGGA

Bogga Internetka	CINWAANKA BOGGA
Foomka Isqorida	www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/13-862.pdf
Raadi Daryeel bixiye (keliya adeega-lacag-la'aanta ah)	https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider
Bogga internetka Macmiilka ProviderOne	https://www.waproviderone.org/client
Washington Healthplanfinder	www.wahealthplanfinder.org
Kusoo dhowoow buugg yaraha Apple Health	www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/22-1298.pdf